

Waxyeelooyinka tallaalka COVID-19

Tallaalada oo dhami waxay sababaan waxyeelooyin, oo ay ku jiraan talaalada ka hortaga COVID-19. Guud ahaan, dhibaatooyinka soo raaca waa kuwo fudud oo waqtigaaban ah. Wuxaan u aragnaa tallaalada inay yihin kuwo aad u ammaan badan oo si wanaagsan loo diiwaangeliyey.

Tusaalooyinka waxyelada caadiga ah

Xasaasiyada meesha duritaanka

- **Xanuun iyo guduudasho goobta duritaanka**

Waa wax *dabiici ah in lala kulmo falcelin maxalli ah markii maqaarku la duro oo tallaalka la isku duro.*

Xasaasiyad guud ahaaneed

- **Daal**
- **Madax xanuun**
- **Murqo iyo xubno xanuun**
- **Qarqaryo**
- **Qandho yar**

*Kuwani waa calaamado *dabiici ah oo muujinaya in habka difaaca jirka uu falcelin ugu yeesho tallaalka. Uma baahnid inaad wacdid dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto waxyeelooyinkan la yaqaan ee mudada kooban ah.**

Waa inaadan wacin dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto waxyeelooyinkan la yaqaan ee mudada kooban ah. Haddii, tusaale ahaan, aad qabtid qandho yar, waxay tilmaan u tahay in habkaaga difaaca jirka iyo jirkaaga ay uga falcelinayaan tallaalka sidii la rabay.

Tusaalooyinka waxyeelooyinka naadirka ah

- **Falcelin xasaasiyadeed oo daran**
- **Neefsashada oo kugu adkaata**
- **Naqaarka oo finan kasoo baxaan**
- **Wajiga oo barara**

Sida tallaalada oo dhan, xaalado aad u yar oo xasaasiyadeed ka dib marka laga tallaalo COVID-19 ayaa dhici kara. Haddii aad waligaa isku aragtay falcelin xasaasiyadeed oo khatar ah isla markiiba ka dib markii lagu tallaalay ama ka dib markii lagugu duray wax soo saar dawo ah, waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ka hor inta aan lagaa tallaalin COVID-19.

Wax badan ka akhri sst.dk/covid-vaccination iyo lmst.dk